

# INSTRUCTIONS

# HABRAACYO

## Applying for Court-Appointed Attorney

## Codsiga Qareenka Maxkamaddu Qabato

Minn. Stat. § 260C.163, subd. 3  
Sharciga Minn. Stat. § 260C.163, farqadda. 3

### Important Notices and Resources/Ogeysiisyo iyo Macluumaadyo Muhiim ah

The Court has forms and instructions, for some types of cases, as a general guide to the court process. These instructions explain the steps in more detail and answer common questions, but are not a full guide to the law. Court employees may be able to give general information on court rules and procedures, but they cannot give legal advice.

Maxkamaddu waxay haysaa foomam iyo habraacyo, noocyada kiisaska qaarkood, guud ahaan si hoggaan u ah habraaca maxkamadda. Habraacyadaas waxa ay si faahfaahsan u sharxayaan oo ka jawaabayaan su'aalo guud, laakiin sharci ahaan ma aha hoggaan buuxa. Shaqaalaha maxkamadda ayaa laga heli karaa macluumaad guud oo ku saabsan habka iyo habraacyada maxkamadaha, laakiin qofna ma siin karaan talo la xiriirta sharciga.

#### Have questions about court forms or instructions?

#### Su'aalo ma ka qabtaa foomamka ama habraacyada maxkamadda?

- Visit [www.MNCourts.gov/SelfHelp](http://www.MNCourts.gov/SelfHelp)
- Booqo [www.MNCourts.gov/SelfHelp](http://www.MNCourts.gov/SelfHelp)
- Call the MN Courts Self-Help Center at 651-435-6535
- Soo Garaac Taleefanka Xarunta Adigu Caawi Naftaada ama MN Self-Help Center 651-435-6535

#### Not sure what to do about a legal issue or need advice?

#### Marka aadan hubin waxa aad ka yeeleyso arrin sharci ah ama aad talo u baahan tahay?

- Talk with a lawyer
- Kala hadal qareen
- Visit [www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx](http://www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx)
- Booqo [www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx](http://www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx)

## Form You Will Need/Foomkaad U Baahan Doonto

- *Affidavit for Court-Appointed Attorney* (CHP1002)
- *Foomka Markhaatikaca Qareenka Maxkamaddu Qabato* (CHP1002)

The form is available online at <https://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=5&f=875>.

Foomka waxaa laga heli karaa <https://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=5&f=875>.

Helpful materials may be found at your public county law library. For a directory, see <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp> . For more information, contact court administration or call the Minnesota State Law Library at 651-297-7651.

Waxyaabo ku caawin kara waxaad ka heli kartaa maktabadda dadweynaha ee deegaanka qeybta sharciga. Arrimaha diiwaanka, ka eego <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp> . Wixii faahfaahin dheeraad ah, kala xiriir maamulka maxkamadda ama soo garaac maktabadda Minnesota State Law Library taleefankooda 651-297-7651.

### General Information/Macluumaad Guud

If you cannot afford to pay for an attorney, you may qualify for a court-appointed attorney. Under the law, the court may appoint an attorney if:

Haddii aadan iska bixin karin lacagta qareenka, waxaad xaq u yeelan karaa qareen maxkamaddu kuu qabato. Sida sharcigu dhigayo, maxkamaddu waxay qareen kuu qaban kartaa haddii:

1. You or any legal dependent living in your household are receiving public assistance under one or more of the following means-tested government benefit programs:  
Adiga ama qof aad sharci ahaan masuul ka tahay oo guriga kugula nool waa in aad qaadataan kaalmo dowladeed sabatoo ah mid ama in ka badan oo ah barnaamijyo kaalmo dowladeed oo la idiin oggolaaday:

Minnesota Supplemental Assistance (MSA) Programs; Minnesota Family Investment Program (MFIP); Food Stamps (EBT Card); General Assistance; MinnesotaCare; Medical Assistance; Energy Assistance; and Supplemental Security Income (SSI).

Barnaamijyada Minnesota Supplemental Assistance (MSA); Minnesota Family Investment Program (MFIP); Food Stamps (Kaarka EBT); General Assistance; MinnesotaCare; Medical Kaalmo; Kaalmada Korontada; iyo Gunnada Dadka Hawlgabay (SSI).

### OR/AMA

2. Your assets and income are not enough to pay for the reasonable costs charged by a private attorney in your area while also paying for the common necessities of life for yourself and the people you support. "Assets" are things that are not necessary to meet your basic needs and that you could easily sell. Your house and car are not included.

Hantidaada iyo dakhligaagu waa in aysan kugu filneyn in aad ku bixiso lacag macquul oo uu kaa rabo qareen aad qabsan karto adiga oo iska bixinaya baahida kharashka nolashaada ee adiga iyo dadka aad masruufto. "Hanti" waa waxyaabaha aan ahayn baahidaada aasaasiga ah ee waa wax aad si fudud u sii iibin karto. Gurigaaga iyo gaarigaagu kuma jiraan.

If you believe you meet one of the categories above, you can apply for an attorney to be appointed by the court and paid for by the county.

Haddii aad rumeysan tahay in aad ka soo bixi karto mid ka mid ah shuruudaha kore, waxaad soo codsan kartaa in ay qareen kuu qabato maxkamadda oo degmada ayaa kaa bixin doonta.

**Step 1/Tallaabada 1-aad**  
**Fill Out *Affidavit for Court-Appointed Attorney* (CHP1002)**  
**Soo Buuxi *Foomka Markhaatikaca Qareenka Maxkamaddu Qabato***  
**(CHP1002)**

If you need help completing the *Affidavit*, let a court administration staff person at your local county courthouse know. Once the *Affidavit* is complete, sign the *Affidavit* under penalty of perjury. This means you are stating that the information in the *Affidavit* is true to the best of your knowledge. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo foomka *Markhaatikaca*, u sheeg shaqaalaha degmada maxkamadda aad ku nooshahay. Marka foomka *Markhaatikaca* ah la buuxiyo, ku saxiix foomka *Markhaatikaca* ciqaabta dhaarta beenta ulakaca ah. Taas macnaheedu waa in aad sheegeyso in macluumaadka ku dhex qoran foomka *Markhaatikaca* uu yahay run sida kuugu fiican ee aad adigu u ogtahay.

Perjury is the crime of intentionally lying or misrepresenting the truth, punishable by jail or other sanctions.

Dhaarta beenta ah waa danbi ah in si ulakac ah been loo sheegay ama runtii looga leexday, ciqaabtiisuna waa xabsi ama cawaaqibxumo kale.

**Step 2/Tallaabada 2-aad**  
**File *Affidavit for Court-Appointed Attorney with Court Administration***  
**U soo gudbi *Foomka Markhaatikaca Qareenka Maxkamaddu Qabato***  
**Maamulka Maxkamadda**

Provide the completed affidavit to the Court Administrator so it can be filed in your case. The court administration staff person will tell you the procedures for having a judicial officer review your application.

U keen foomka markhaatikaca oo buuxsan Maamulka Maxkamadda si loogu xareeyo kiiskaaga. Shaqaalaha maxkamadda ayaa kuu sheegaya habraaca aad ku heleyso in uu garsoore go'aaminaya kuu eego codsigaaga.

**What to Expect Next.../Waxaad Filaneyso ee Kuugu Xiga...**

If the judicial officer grants your request for a court appointed attorney, the order will only apply to the court case listed in the caption of the order. Court Administration will assign you to a specific court-appointed attorney and notify you and the attorney of the assignment. The court-appointed attorney will represent your interests in the case until court jurisdiction is terminated

and time has lapsed for filing and resolution of all post-trial motions under Juvenile Protection Rule 21; or upon further order of the court.

Haddii uu garsooraha go'aaminaya kuu oggolaado codsiga ah in maxkamaddu qareen kuu qabato, amarkaas waxa uu khuseynayaa kiiska dusha kuugu qoran oo keliya. Maamulka Maxkamadda ayaa kugu soo qoraya qareenka maxkamaddu kuu qabatay iyadoo ku soo ogeysiinaya qareenka kuu xilsaaran. Qareen maxkamaddu qabato ayaa wakiil kaaga noqonaya danahaaga kiiska ilaa ay maxkamaddu kaa joojiso oo uu ka dhaco wakhtiga aad soo gudbineyso iyo go'aanka mooshinka maxkamadeynta ka dib sida uu dhigayo Sharciga Difaacidda Dhallinta ee 21; ama amar kale oo ay maxkamaddu bixiso.

The court may alter or amend the order at any time before expiration of the order.

Maxkamadda ayaa beddeli karta foomkan ama qoraalkan markii ay rabto ka hor inta uusan dhammaan wakhtiga amarka.